

## **Haddii ay Boolisku ku joojiyaan**

- Waxa aad xaq u leedahay in aad iska aamusnaato. Haddii aad dooneysyo in aad iska aamusnaato, u sheeg sarkaalka.
- Is daji Ha cararin. Ha murmin, ha dhago adkaan, booliskana haka hor istaagin shaqadooda. Gacmahaaga waa in ay mar kasta arki karaan Boolisku.
- Weydii haddii aad xor tahay oo aad bixi karto. Haddii ay ku jawaabaan haa, adiga oo degan ka soco.
- Waajib kuguma aha in aad ogolaato in lagu baaro ama alaabadaada la baaro.

## **Haddii ay Boolisku ku joojiyaan adiga oo gaari wata**

- Meelamaan ah ku jooji sida ugu dhaqsaha badan. Dami gaariga, daal nalalka gudaha ee gaariga, kala bar miraayadda daaqada fur, gacmahaaga shukaanta dul saar.
- Marka lagaa codsado, tus booliska aqoonsigaaga, lahaashaha gaariga iyo ceymiska gaariga.
- Haddii saraakiisha socdaalku doonayaan in ay baaraan gaarigaaga, waad diidi kartaa.
- Wadaha gaariga iyo rakaabkuba waxa ay xaq u leeyihii in ay iska aamusnaadaan. Haddii aad tahay rakaabka saran gaariga, waxa aad weydiin kartaa haddii aad xor tahay oo aad bixi karto. Haddii ay ku jawaabaan haa, waad iska socon kartaa adiga oo aamusan.

## **Haddii lagu weydiyo sharciga aad waddanka ku joogto**

- Waxa aad xaq u leedahay in aad iska aamusnaato. Waajib kuguma aha in aad ka jawaabto haddii lagu weydiyo xageed ku dhalatay, in aad heysato baasboorka waddanka (dhalashada) iyo sida aad waddanka ku soo gashay. (Sharchiyo gaar ah ayaa lagu maamulaa xuduudaha caalamiga ah iyo gegooinka dayuuradaha iyo dadka ku soo gala dal ku galka aan qaxooti doonka aheyn, oo ay ka mid yihiin dalxiisayaasha iyo ganacsatada.)
- Haddii aadan heysan baasboorka oo aad leedahay warqado sharchi ah oo dalka lagu joogo, waa in aad tustaa saraakiisha socdaalka haddii ay ku weydiyaan saraakiisha socdaalka.
- Haka been sheegin sharcigaaga ama ha siin aqoonsi been abuur ah.

## **Haddii saraakiisha booliska ama socdaalku yimaadaan gurigaaga**

- Waajib kuguma aha in aad ogolaato in ay soo galaan ilaa ay heystaan amar maxkamadeed oo qaali uu saxiixay.
- Weydii in ay ku tusaan amar maxkameed. Ciidamadu waxa ay baari karaan goobta iyo waxyaabaha lagu sheegay amarka maxkamadda.
- Amar maxkameed oo lagu soo xirayo waxa ay ciidamada nabadjelyada u ogolaaneysaa in ay galaan guriga haddii ay aaminsan yihiin in qofka ay raadinayaan uu guriga ku jiro.
- In ICE ay heystaan amar ay qofka ku soo xiraan ama in wadanka laga saaro uma ogolaaneyso in ay guriga galaan ogolaasho la'aan.

## **Haddii ay Boolisku ku xiraan**

- Ha dhago adeygin.
- U sheeg in aad dooneysyo in aad iska aamusnaato ama weydiiso qareen. Haddii aadan awoodi karin qareen, dawladda ayey waajib ku tahay in ay kuu qabato qareen.
- Waxna ha dhihin, waxna ha saxiixin, hana gaarin wax go'aan ah adiga oo aan la tashan qareen.
- Wuxuu aad xaq u leedahay in lagu siiyo telefoon aad dadka ka wici karto. Boolisku kuma dhagaysan karaan marka aad waceysyo qareenkagaaga.
- Cid aan aheyn qareenkagaaga hakala hadlin sharciga aad waddanka ku joogto.
- Saraakiisha socdaalka ayaa laga yaabaa in ay xabsiga kugu soo booqdaan. Haka jawaabin su'aalaha hana sixiixin wax qoraal ah ka hor inta aadan la hadlin qareen.
- Warqadaha oo dhan akhri. Haddii aadan fahmin ama aadan akhrin karin, waxa aad sheegtaa in aad u baahan tahay turjubaan.

MARKA AY KU JOOJIYAN BOOLISKA  
AMA CILDAMADA SOCDAALKA

# RIGHTS

—★— YOUR —★—

# KNOW



ACLU

6/17

Si aad u heesho maccluumaad dhereraad ah soo boodo bogeenne internetka: [www.aclu-wa.org](http://www.aclu-wa.org)

yihin gegeoyinka dayuuradaha.

lagu maamulaa baraha koontarooka iyo maraka aad soo galayso Mareykaneka loo ay ka mid Maccluumaadkan halikan ku xusan ma aha talo siiн xaggga sharciiga ah. Sharciyo gaar ah ayaa

- waxa aad cabasho soo gudbin kartaa adiga oo aan is bandhigin. hay addas ama quidiga dacwadaha rayidka Xaaladaha intooda badan,
- Qorral cabasho ah u gudbi waaxda baarista cabashoonyinka ee adeeg caafimaad u wedydiso oo sawir ka qaad dhaawacaaga.
- halkaa aad kale xiriini karto. Haddii dhawwac ku soo gaarray, degdeg iyo wixii kale oo faahfaahin ah. Ka qaado daska good joogayaasha sarkalka iyo lambaraka gaariga, hay adda ay sarakkiishu ka socdaan
- Gor wax walle oo aad xassuusato, oo ay ka mid yihin lambaraka

## Haddii Amimsan Tahay in Xuquuadaha Lagu Xadgudba

- goyskaaga. Waxa ay caawiineysaa in la ogado halka aad ku xiran tahay. Waai in aad taadaanaa lambarakaaga socdaalka ("A" number) una sheeg sarkaal uu gaarsiyoo qunsuliyadda in aad xiran tahay.
- Waxa aad xad u leedahay in aad la xirrito qunsuliyaddaada aad ku siil joogi karto waddankan.
- ama aad ogolatto in waddankaa lagaa saaro, adiga oo aan la hadlin dareen. Haddii aad saxiixdo, waxa aad ka haryesa fursadda aad ku
- Wax qorral ah ha saxiixin, siida in aad doorato in lagu dhoomifyo ku joogto.
- Cid ahan aheyn dareenkaga hakala hadlin sharciiga aad waddanka ama qillimaha jaaban.
- heysan dareen, waxa aad wedydissa dareenada lacag la'aanta ah qabneyso dareen, haddii aadan madaxa ka jiraneyn. Haddii aadan xad waxa aad u leedahay dareen, laakiin dawlaadu kuumma
- U sheeg sarakkiisha socdaalka in aad doonneyso in aad iska ammunaato.

## Haddii ay hay adda Socdaalka (ICE) ku xiran